DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 23AAD | CADADKA 8AAD | TAARIIKH: 15/08/23 | Lam. 04 |
|---|---|---|---|

# FAAFINTA RASMIGA AH

# OFFICIAL GAZETTE

# الجريدة الرسمية

## WAX-KA-BEDELKA SHARCIGA DOORASHOOYINKA GOLEYAASHA DEEGAANKA DOWLADDA PUNTLAND

| TUSMADA | |
|---|---|
| **Qeybta 1aad** | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**Wax-ka-bedelka Sharciga Doorashooyinka Goleyaasha Deegaanka Dowladda Puntland** |
| **Qeybta 2aad** | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 3aad** | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 4aad** | Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br>WAXBA MALEH |
| **Qeybta 5aad** | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br>WAXBA MALEH |

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA

ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Sharci Lr. 04 ee 15-ka Agoosto 2023, kuna saabsan Wax-ka-bedelka Sharciga Doorashooyinka Goleyaasha Deegaanka Dowladda Puntland**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80-aad farqadiisa 16-aad.

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/53/2023, kuna taariikhaysan 10-ka Agoosto 2023.

**Wuxuu soo saaray**

**Sharciga soo socda:**

**Qodobka 1aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Wax-ka-bedelka Sharciga Doorashooyinka Goleyaasha Deegaanka Dowladda Puntland

**Qodobka 2aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

**Qodobka 3aad**

Dhaqangal Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

**Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

Tell: +252-090-7797147; E-mail: dg.oop@plstate.so, oop@plstate.so; Website: www.plstate.so

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**
**GOLAHA WAKIILLADA**

**ولاية بو نت لاند الصومال**

**مجلس النواب**

**Xafiiska Guddoomiyaha**
**Office of the Speaker**

**Tix:-XGGW/DPL/53/2022** **Garoowe, Khamiis** **Taariikh:- 10/08/2023**

**Ku:- Madaxweynaha DPL** **Garoowe**

**Ujeeddo: - Ansixinta Wax-ka-bedelka Xeerka Doorashooyinka Goleyaasha Deegaanka Dawladda Puntland**

**Mudane Madaxweyne,**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -**

**MARKUU ARKAY:-** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa **64-aad**

**MARKUU ARKAY:-** Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: MW/DPS/125/2023 ee July 22, 2023, kuna saabsan wax-ka-bedelka Xeerka Doorashooyinka Goleyaasha Deegaanka Puntland.

**MARKUU TIX-GELIYEY: -** Baahida loo qabo Wax-ka-bedelka Iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Goleyaasha Deegaanka Puntland.

**MARKUU DHEGEYSTEY: -** Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 52-aad, Fadhigiisii 19-aad ee 10.08.2023 cod gacanta tag ah ku Ansixiyeen wax-ka-bedelka Xeerka Doorashooyinka Goleyaasha Deegaanka Dawladda Puntland. Guntanka fadhiga oo ahaa (**34**) Mudane, waxaa ugu codeeyey oggol (**32**) Mudane, Diidmo majirin, halka ay ka aamuseen (**2**) Mudane.

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Wax-ka-bedelka Xeerka Doorashooyinka Goleyaasha Deegaanka Dawladda Puntland.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Md. Cabdirashiid Yuusuf Jibriil**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA DAWLADDA PUNTLAND * OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES *

# DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

## GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND

# WAX-KA-BEDELKA XEERKA DOORASHOOYINKA GOLEYAASHA DEEGAANNADA EE DAWLADDA PUNTLAND

GAROOWE, AGOOSTO, 2023

# XEERKA DOORASHOOYINKA GOLEYAASHA DEEGAANNADA EE DAWLADDA PUNTLAND

## EREY-BIXINTA

1.1 **GUDDIGA**: Waxaa loola jeedaa Guddiga Doorashooyinka Puntland ee ku meel gaarka ah (GDPKMG) ee loo xilsaaray maamulidda iyo ka garsooridda doorashooyinka.

1.2 **GOOB-CODBIXIN**: Waxaa loola jeedaa goobaha tirooyin dadweynaha ka mid ah oo isku deegaan dhaw, ka dhiibanayaan codadkooda.

1.3 **WAKIIL**: Waxaa loola jeedaa xubinta urur/xisbi u soo wakiishay la socodka hawlaha doorashada ee goob cod-bixineed ama xaafiisyada doorashada.

1.4 **GOLAHA DEEGAANKA**: Waxaa loola jeedaa golaha ay cod-bixiyayaasha degmadu u doortaan maamulka iyo xeer-dejinta D/hoose ee degmada.

1.5 **GOBOL-DOORASHO**: Waxaa loola jeedaa soohdimaha kulmiya degmooyin doorasho.

1.6 **DEGMO-DOORASHO**: Waxaa loola jeedaa soohdimaha kulmiya goobo-doorashooyin.

1.7 **ASTAAN**: Waxaa loola jeedaa sumadda ama calaamadda u gaarka ah hal urur/xisbi ee lagu aqoonsanayo.

1.8 **LIIS**: Waxaa loola jeedaa magacyada murashixiinta uu soo gudbiyey urur/xisbi, loona kala hormariyey siday u kala helayaan doorashada.

1.9 **OLOLAHA DOORASHADA**: Waxaa loola jeedaa hawl-galka ay ururada/xisbiyadu iyo murashixiintoodu ugu tartamayaan iska-dhaadhicinta iyo soo kala jiidashada cod-bixiyayaasha.

1.10 **XAFIISKA DHEXE**: Waxaa loola jeedaa xarunta ugu saraysa ee laga maamulayo hawsha doorashada ee ay ku shaqeeyaan Guddiga Doorashooyinku.

1.11 **XAFIISKA DEGMADA**: Waxaa loola jeedaa xafiiska laga maamulayo goobaha cod-bixinta ee degmada.

1.12 **XAFIISKA GOBOLKA**: Waxaa loola jeedaa xafiiska laga maamulayo hawlaha doorashada ee gobolka.

1.13 **XAFIISKA GOOBTA**: Waxaa loola jeedaa xafiiska laga maamulayo hawlaha doorashada ee goob cod-bixineed.

1.14 **GOOB-JOOGAYAAL**: Waxaa loola jeedaa dad wakiil ka ah beesha caalamka ama ururada maxaliga ah oo Guddiga Doorashada Puntland u ogolaado in ay goob-joog ka ahaadaan, qiimaynna ku sameeyaan qaabka ay doorashadu u dhacayso.

## QODOBKA 1-aad
## UJEEDDADA XEERKA

Xeerkan waxaa lagu Maamulayaa Doorashooyinka Golayaasha Deegaannada ee Puntland.

## QODOBKA 2-aad
## TIRADA IYO DERAJOOYINKA GOLAYAASHA DEEGAANNADA

Tirada degmooyinka dawladda Puntland waa 48 degmo doorasho, magacyadooda iyo derejooyinkoodu waxay ku cad yihiin Xeerka Maamulka, Gobollada, Degmooyinka, iyo Dhismaha Dawladaha Hoose ee DPL.

b. Golaha deegaanka magaalo-madaxyada goballada darajada A waa 33 xubnood.

| *Bari* | *Karkaar* | *Nugaal* | *Mudug* | *Sanaag* | *Sool* | *Cayn* | *Heylaan* | *Raas*-casayr |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Boosaaso | Qardho | Garoowe | Galkacyo | Ceerigaabo<br>Badhan | Laascaanod | Buuhoodle | Dhahar | Caluula |
| **A** | **A** | **A** | **A** | **A** | **A** | **A** | **A** | **A** |

t. Golaha deegaanka degmooyinka derajada B waa 27 xubnood (eeg shaxda hoose).

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| ***Bari*** | Qandala **B** | Iskushuban **B** | Ufayn **B** | Carmo **B** | Xaafuun **B** |
| ***Karkaar*** | Bayla **B** | Waaciye **B** | Rako **B** | | |
| ***Nugaal*** | Eyl **B** | Burtinle **B** | Dangorayo **B** | | |
| ***Mudug*** | Galdogob **B** | Jariiban **B** | Xarfo **B** | | |
| ***Sanaag*** | Laasqoray **B** | Xingalool **B** | | | |
| ***Sool*** | Taleex **B** | Xuddun **B** | Boocame **B** | | |
| ***Raascasayr*** | Baargaal **B** | Bareeda **B** | | | |

j. Golaha deegaanka degmooyinka derajada C waa 21 xubnood (eeg shaxda hoose).

| | | | |
|---|---|---|---|
| ***Bari*** | Balidhadin **C** | | |
| ***Karkaar*** | Dhu-dhub **C** | Xumbays **C** | Shaxda **C** |
| ***Nugaal*** | Godobjiiraan **C** | | |
| ***Mudug*** | Bursaalax **C** | Saaxo **C** | Tawfiiq **C** |
| ***Sanaag*** | Fiqifuliye **C** | | |
| ***Sool*** | Kalabaydh **C** | Dharkayn geeyo **C** | |
| ***Cayn*** | Horufadhi **C** | Widhwidh **C** | |
| ***Haylaan*** | Buraan **C** | Ceelaayo **C** | |
| ***Raascasayr*** | Gumbax **C** | Murcanyo **C** | |

## QODOBKA 3-aad
## SHURUUDAHA LAGA RABO COD-BIXIYAHA

3.1 Qof kasta oo isku diiwaan-gelinaya cod-bixiye waa inuu buuxiyaa shuruudaha soo socda:-

b. Waa inuu yahay qof u dhashay ama ku dhashay Puntland ama Puntladnimada ku kasbaday sifo sharci ah.

t. Muwaadin Soomaaliyeed oo Puntland deganaa tobankii (10) sano ee ugu dambaysey.

J. Waa in aan da'diisu ka yarayn sideed iyo toban (18) sano.

x. Waa inuu maskax ahaan fiyow yahay.

Kh.Waa inaan shantii (5) sano ee ugu dambaysey maxkamad awood u lihi si kama dambays ah ugu xukumin dembi culus, oo ay raacisay inay laalan yihiin xuquuqdiisii siyaasadeed iyo inuusan qaban karin xafiis/jago dawladeed.

d. Haystana kaarka cod-bixiyaha

3.2 Muwaadinnimada qofka, waxaa saldhig u ah inuu leeyahay mid ka mid ah dukumintiyada soo socda:-

b. Waraaq dhalasho oo ku helay/heshay si sharci ah.

t. Kaadhka aqoonsiga Puntland.

j. Baasaboor Soomaali ah.

## QODOBKA 4-aad
## XUQUUQDA COD-BIXIYAHA

Cod-bixiye kasta oo buuxiyey shuruudaha xeerku tilmaamay, wuxuu xaq u leeyahay:

4.1 Cod-bixiyuhu wuxuu codkiisa ka bixinayaa goobta cod-bixinta ee uu joogo maalinta doorashada, marka laga diiwaangeliyo goobta lana hubiyo in uu yahay Muwaadin Puntland ah.

4.2 Codku waa in uu ahaado mid shakhsi ah, xor ah, toos ah, qarsoodi ah oo si siman loo tixgeliyo.

4.3 Cod-bixiye kastaa waxa uu yeelanayaa hal cod oo kaliya doorashadiiba.

4.4 Sida ku cad qodobka 41aad ee Dastuurka DPL, waxaa muwaadin kasta uu xaq u leeyahay in uu codeeyo, marka laga reebo labada muwaadin oo xuquuqdooda la laalay, kuna cad

qodobka 43aad ee Dastuurka DPL. Sidaa darteed, xubnaha Guddiga Doorashooyinka, hawl-wadeennada xafiiska doorasho ee goobta u xilsaaran ilaalinta nidaamka doorashada ee goobta cod-bixintu waxay ka codayn karaan goobta cod-bixineed ee ay ka hawl-galayaan maalinta cod-bixinta.

## QODOBKA 5-aad
## SHAQAALAHA DAWLADDA IYO HAY'ADAHA DAWLADDA

5.1 Shaqaalaha dawladda, kuwa hay'adaha madaxa bannaan ee dawladda, saraakiisha iyo askarta ciidamada qaranka darajo kasta ha lahaadeene, looma ogola in ay isu sharaxaan doorashooyinka deegaannada haddii aanay shaqo ka tagis soo qoran lixdan (60) cisho ka hor taariikhda qabashada doorashada.

5.2 Xubnaha la doortay ee golaha deegaanada oo markaas xilka haya, xeerkani ma saamaynayo.

5.3 Shaqo ka tegidda waxaa shardi u ah in qoraal lagu soo caddeeyo, xafiiska ama hay'adda awoodda u lihina soo caddeyso.

## QODOBKA 6-aad
## WAQTIGA QABASHADA DOORASHOOYINKA

6.1 Ugu yaraan 75 maalmood ka hor maalinta doorashada, wuxuu Guddiga Doorashooyinka ee ku meel gaar ah (GDKMG) u dirayaa madaxweynaha go'aankooda maalinta doorashada, Madaxweynuhuna waa in uu lix (6) maalmood gudahood ku faafiyo go'aankaas.

## QODOBKA 7-aad
## GOOBAHA COD-BIXINTA

7.1 Marka la qabanayo doorashada golayaasha deegaannada, waxaa dalka loo qaybinayaa tiro degmo-doorasho (electoral districts) oo loo sii qaybinayo goobo cod-bixineed (polling stations) iyadoo la waafajinayo soohdimaha Gobollada Dawladda Puntland ee ku xusan Dastuurka qodobkiisa 7-aad, faqradaha 1,2,3 & 4.

7.2 Guddiga Doorashooyinka ayaa samayn doona goobaha cod-bixineed ee degmooyinka ugu

yaraan lixdan (60) maalmood ka hor taariikhda ay dhacayso cod-bixintu, wuxuuna arrintaas kala tashanayaa Wasaaradda Arrimaha Guddaha, Guddoomiyayaasha Gobollada iyo Degmooyinka.

## QODOBKA 8-aad
## QAAB-DHISMEEDKA HANNAANKA DOORASHOOYINKA

Qaab-dhismeedka hannaanka doorashadu wuxuu ahaanayaa sidan:

8.1 Xafiiska goobta cod-bixinta doorashada.

8.2 Xafiiska degmada ee doorashada.

8.3 Xafiiska gobolka ee doorashada.

8.4 Xafiiska dhexe ee doorashooyinka.

## QODOBKA 9-aad
## XAFIISKA GOOBTA COD-BIXINTA

9.1 Guddoomiyaha, Xoghayaha iyo labada hubiye waxaa magacaabaya Guddiga Doorashooyinka, waxana lagu samayn karaa isku-beddelid haddii loo baahdo.

9.2 Haddii arrin deg deg ahi timaado, iyadoo ay cod-bixintu socoto,loona baahdo in shaqada laga joojiyo hubiyaha ama xoghaynta waxaa awoodda shaqo ka joojinta leh Guddoomiyaha goobta cod-bixinta.

9.3 Xafiiska goobta cod-bixintu, wuxuu u xilsaaran yahay fulinta hawsha doorashada ee goobta

## QODOBKA 10-aad
## XAFIISKA DEGMADA EE DOORASHADA

10.1 Xarunta degmo kasta waxaa ka jiraya xafiis doorasho degmo, wuxuuna yeelanayaa

b. Guddoomiye.

t. laba hubiye, iyadoo hubiyaha ugu da'da weyn uu noqonayo guddoomiye ku-xigeen.

j. Xoghayn iyo laba tiriye.

10.2 Guddoomiyaha, guddoomiye ku-xigeenka, hubiyaha, xoghaynta iyo labada tiriye, waxaa

magacaabaya Guddiga Doorashooyinka dhexe, iyagaana awood u leh isku-beddelkooda.

10.3 Xafiiska doorasho ee degmadu, wuxuu u xilsaaran yahay fulinta hawsha doorashada ee degmada.

## QODOBKA 11-aad
## XAFIISKA GOBOLKA EE DOORASHADA

11.1 Magaalo-madaxda gobol kasta waxaa ka jiraya xafiis doorasho gobol, waxaana ka hawl-galaya:

b. Guddoomiye.

t. Guddoomiye ku-xigeen iyo

j. Xoghaye.

11.2 Xubnaha kor ku xusan waxaa magacaabaya Guddiga Doorashooyinka.

11.3 Xafiiska gobolka ee doorashadu, wuxuu u xilsaaran yahay fulinta hawlaha doorashada ee gobolka.

## QODOBKA 12-AAD
## AWOODAHA XAFIISKA DHEXE EE DOORASHOOYINKA

Xafiiska dhexe ee doorashooyinku wuxuu awood u leeyahay:-

12.1-In uu cayimo wakhtiga doorashooyinka la qabanayo, iyagoo madaxweynaha u gudbinaya si uu digreeto ugu soo saaro, madaxweynuhu sida ku xusan qodobka 6-aad ee xeerkan waa in uu (6) lix maalmood ku faafiyo digreetada

12.2-In uu cayimo tirada iyo goobaha cod-bixinta ee degmooyinka iyo gobollada.

12.3-In uu magacaabo, eryo, anshax mariyo shaqaalaha xafiiska dhexe, xafiisyada doorashooyinka degmooyinka, gobollada iyo goobaha cod bixinta.

12.4-In uu kormeero si kadis ah iyo si qorsheysanba goobaha doorashada iyo meel kasta oo hawshiisu khusayso

12.5-In uu xalliyo go'aanna ka gaaro hirgelinta cabashooyinka ka imaanaya hirgelinta

doorashooyinka, ururada/xisbiyada siyaasadeed iyo kuwa hoos yimaada xafiiska guddiga doorashooyinka.

12.6- Xallinta khilaafaadka ururada siyaasadda dhexdooda iyo khilaafaadka ka yimaada arrimaha doorashada waxaa xafiiska dhexe ee doorashooyinku u wakiilan karaa xafiisyada doorashooyinka ee heer Gobol/Degmo ama goobta cod-bixinta

12.7-Ansixinta ururada/xisbiyada siyaasadeed, la socoshada in falalkoodu sharciga waafaqsan yihiin iyo xallinta murannada ka dhex dhaca urur/xisbi siyaasadeed markii xubin ka mid ahi codsato in guddigu arrintooda go'aamiyo.

12.8-In natiijada doorashada ee gobollada lagu soo xerooyo xafiiska dhexe ee doorashooyinka.

12.9-In uu xafiisku xalliyo wixii muran ah ee uga soo gudba Gobollada doorashada.

12.10-In uu xafiiska dhexe ku dhawaaqo natiijada guud ee ku meel gaarka ah ee ka soo gudubtay gobollada doorashooyinka, ka dibna u gudbiyo maxkamada sare.

## QODOBKA 13aad
## HAWL-WADEENADA XAFIISYADA DOORASHADA

13.1 Guddigu wuxuu hubinayaa in magacaabidda saraakiisha kala duwan ee gobollada, degmooyinka iyo goobaha cod-bixinta lagu sameeyo amin ama wakhti ay si buuxda ugu gudan karaan mas'uuliyadahooda iyo awooddooda xeerku siiyey.

13.2 Shuruudaha lagu xulayo guddoomiyayaasha xafiisyada doorashada ee degmada iyo gobolka waxa ay la mid yihiin kuwa lagu xulay Guddiga Doorashooyinka, marka laga reebo da'dooda oo ah in aanay ka yarayn 36 jir kana weynayn 70 jir.

13.3 Qofkii loo magacaabo xilalka xafiisyada doorashooyinka, shaqada lagama joojin karo sabab la'aan.

13.4 Xubnaha loo magacaabay xafiisyada doorashada ee goobaha cod-bixinta degmada iyo gobolka, waxaa dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Degmada (dhaar fagaare ah)

waxaana loo dhaarinayaa dhaarta dastuuriga ah ee ku cad qodobka 132-aad.

13.5 Guddigu waxay mid mid dhaarta kor ku xusan kaga hor dhaaranayaan Guddoomiyaha Maxkamadda Degmada.

13.6 Xubnaha ciidamada qalabka sida ama kuwa leh qaab-ciidameed, guddoomiyayaasha gobollada, degmooyinka, xubnaha golayaasha deegaannada iyo murashixiinta u taagan doorasho midkoodna looma magacaabi karo in ay xil ka qabtaan xafiisyada doorashooyinka.

13.7 Hawl-wadeenada goobaha cod-bixinta, kuwa xafiisyada doorashada ee degmooyinka ama gobollada, waxay muddada shaqadoodu ku dhammaanaysaa marka lagu dhawaaqo natiijada doorashada, hase yeeshee, Guddiga Doorashooyinku waxay kordhin karaan muddada shaqada intii loo baahdo.

## QODOBKA 14-aad
## GUNNADA HAWL-WADEENADA

14.1 Gunnooyinka ay qaadanayaan hawl-wadeenada xafiisyada doorashooyinka waxaa qorshaynaya guddiga, iyagoo ku salaynaya xilalka hawl-wadeenadu ku kala magacaaban yihiin.

14.2 Hawl-wadeenka loo diro hawl ka baxsan halka uu ku noolaa, wuxuu yeelanayaa sahay safar (subsistence allowance) muddada uu maqan yahay, waxana qorshaynaya guddiga.

## QODOBKA 15-aad
## DHAWRSANAANTA, GUDDIGA, MURASHIXIINTA IYO HAWL-WADEENADA

15.1 Dhammaan hawl-wadeenada ka hawl-galaya xafiisyada doorashooyinka, wakiilada ururada/xisbiyada ee xeerkani tilmaamay, waxay sharci ahaan (legal status) la mid yihiin saraakiil guud (public officer).

15.2 Murashixiinta, hawl-wadeenada xafiisyada doorashooyinka iyo wakiilada ururada/xisbiyada, lama xiri karo xilliga doorashada, haddii aan la qaban iyagoo faraha kula jira fal dambiyeed oo aysan hawsha ku sii wadi karin, kaas oo wax u

dhimaya hufnaanta doorashada ama amniga guud, waxaana lagu wareejinayaa ciidanka ammaanka.

15.3 Haddii qof ka mid ah dadka lagu xusay faqradda 2aad ee qodobkan, uu galo dembi waxaa dembigaas lagu soo eedayn karaa marka ay doorashadu dhammaato oo laga wareejiyo hawsha uu u xil-saarnaa.

## QODOBKA 16aad
## HABKA DOORASHADA

16.1 Habka doorashooyinka deegaannada Puntland, wuxuu noqonayaa habka isu qiyaasidda saamiyada kuraasta iyo tirada codadka uu urur/xisbi ka helo degmo.

16.2 Marka ay dhammaato cod-bixintu, lana tiriyo tirada codadka saxda ah ee aan muran ka taagneyn, ee degmo doorasho kasta, wadarta codadkaas waxaa loo qaybinayaa tirada kuraasta loo qoondeeyey degmadaas, si loo helo tirada codadka ee hal kursi.

16.3 Urur/xisbi kasta tirada codadka uu ka helo degmada ayaa u ah jaangoynta tirada kuraasta uu ka helayo degmadaas.

16.4 Hadday jirto kuraasi bannaan (aan ururna/xisbina u helin codad ku filan), kuraastaas waxaa loo qaybinayaa ururada/xisbiyada haysta jajabka ugu waaweyn.

16.5 Haddii xubin ay banayso Golaha Deegaanka waxaa bedelaya xubinta keydka u ah Xisbiga oo xubin ahaan ugu xiga doorashada.

16.6 Degaamada aanu tartan xisbiyo badan ka jirin, ee hal xisbi keliya uu soo bandhigo liiskiisa cod-bixin laga samayn mayo, waxaana la qaadanayaa dadka xisbigaasi u magacaabay golaha deegaanka, iyadoo ku jaan go'an tiradii degmada laga doonayey, waxana loo raacayaa sida loo soo kala horreysiiyey.

## QODOBKA 17-aad
## QAABKA SOO BANDHIGIDDA MURASHIXIINTA

17.1 Liiska murashixiinta golaha deegaanka, waxaa soo bandhigaya guddiga degmada ee ururka/xisbiga, waana in si cad loo soo muujiyaa:

b. magaca murashaxa oo afarran.

t. meesha uu ku dhashay.

j. sannadka uu dhashay

17.2 Haddii ay jiraan dad isku magacyo ah, waa in la sheego naaneysta (haddii ay jirto) iyo magaca oo afarran.

17.3 Liis kasta shanta (5) magac ee u horeysa, waa in aysan ahaan rag soocan ama dumar.

17.4 Liisaska murashixiinta ururka/xisbiga, waxaa kale oo la soo raacinayaa:

b. caddeynta shaqo ka tegidda oo ku xusan qodobka 6aad ee xeerkan.

t. afar (4) koobi oo ay si wanaagsan uga muuqato astaantii ururku/xisbigu.

j. caddeyn uu bixiyey murashax kasta oo uu ku muujiyey inuu ogol yahay murashaxnimada iyo inuu buuxiyey shuruudaha ku xiran.

17.5 Sida ay murashaxiintu liiska ugu kala horeeyaan, ee la isugu xigsiiyey ayaa loo aqoonsanayaa in loo soo kala doortay ururka/xisbiga gudihiisa.

17.6 Muran kasta oo ka dhasha xeraynta ama bandhigga liis murashixiin oo ka dhex dilaaca urur/xisbi gudihiisa, waxaa go'aan ka gaaraya golaha dhexe ee ururka/xisbiga arrintu khusayso.

17.7 Guddiga doorashooyinku waa in uu hayaa nuqulka asalka ah ee xubnaha Golaha Dhexe ee ururka/xisbiga.

## QODOBKA 18-aad
## ASTAAMAHA LIISTOOYINKA MURASHIXIINTA

18.1 Ururna/xisbina waa in aanu isticmaalin astaan uu urur/xisbi kale horey u isticmaalay.

18.2 Astaantu waa in ay ahaato mid gaar ah oo muujinaysa sumadda aqoonsiga, hase yeeshee, waa in aanay ka muuqan calaamado dawladdeed, qabiil ama dariiqo.

## QODOBKA 19-aad
## DEEBAAJI

Murashixiinta golayaasha deegaanka wuxuu midkiiba bixinayaa deebaaji aan celin lahayn oo dhan Sh. So. 3,000,000 (Saddex milyan), celisna lahayn waxaana lagu shubayaa Bangiga dhexe ee Dawladda Puntland.

## QODOBKA 20-aad
## QABASHADA LIISASKA MURASHIXIINTA

20.1 Liistooyinka murashixiinta deegaanada, waxaa la geynayaa xafiisyada doorashada ee degmooyinka, ka hor 5-ta galabnimo, maalinta 50aad, inta aanay cod-bixintu dhicin.

20.2 Xafiiska guddiga doorashada ee degmooyinka, waxay hubinayaan in murashixiinta liisaska ku qorani buuxinayaan dhammaan shuruudaha u dhigan.

20.3 Haddii xafiiska degmadu uu ka helo wax khalad ah dokumitiga loo keenay, waxay wargelinayaan ururka/xisbiga, iyagoo siinaya muddo 5 casho gudahood ah inay ku soo saxaan ama keenaan murashax cusub.

20.4 Haddii urur/xisbi ku qanci waayo go'aanka xafiiska degmada, waxay cabashadooda u soo gudbinayaan xafiiska guddiga muddo 48 saac gudahood ah, si guddiga dhexe ay dib ugu eegaan, go'aanna uga qaataan.

## QODOBKA 21aad
## SHEEGIDDA LIISASKA MURASHIXIINTA

Guddiga iyo xafiisyadiisu waa in ay 26 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta ku dhejiyaan liisaska murashixiinta degmada, goobo fagaareyaal ah, boorarka ogeysiiska, xafiisyada dawladaha hoose, waana in laga sheego idaacadaha laguna baahiyo wargeysyada.

## QODOBKA 22-aad
## OLOLAHA DOORASHOOYINKA

22.1 Ololaha doorashooyinku wuxuu bilaabmayaa marka la soo dhejiyo ogeysiiska ku xusan qodobka 21-aad ee xeerkan.

22.2 Muddada ololaha doorashooyinku waxa ay soconaysaa 24 maalmood waxayna joogsanaysaa 48 saac ka hor maalinta doorashada.

22.3 Masuuliyadda bannaan-baxayaasha iyo wixii ay dhibaato geystaan taageerayaashu sida, fawdo, boob, qalalaase amni-darro, waxaa qaadaya ama ka masuul ah madaxda ururka/xisbiga.

22.4 Haddii urur/xisbi taageerayaashiisu geystaan dhibta kor ku xusan, waxaa guddiga doorashooyinku xaq u leeyahay inuu ka joojiyo bannaan-baxa, waxaana laga qaadayaa tallaabada ku habboon ee sharciga waafaqsan.

## QODOBKA 23-aad
## QABASHADA BANNAAN-BAXYADA

23.1 Guddiga Doorashooyinka ayaa diyaarinaya, soona saaraya shaxda isu-soo-baxyada iyo dhoollo-tusyada qorshaysan ee ururada/xisbiyada ee muddada ololaha doorashada, taas oo loogu qoondeeyey tiro maalmo ah oo is-le'eg.

23.2 Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Amniga, Guddoomiyayaasha Gobollada iyo degmooyinka, waxaa ku waajib ah in ay ku dhaqmaan shaxda ay soo saareen guddiga Doorashooyinku xilliga ololaha doorashada.

23.3 Magaalo laguma qaban karo wax ka badan hal bannaan-bax isku maalin.

**QODOBKA 24-aad**
**MUUQAALKA BOODHADHKA**

24.1 Muuqaalka boodhadhka, waraaqaha dacaayadaha ololaha doorashada iyo fariimaha ololaha doorashada ee urur/xisbi ama musharax, waxaa ogolaanaya Guddiga doorashooyinka, isla markaana joojinaya haddii ay ka soo horjeedaan xeerarka iyo anshaxa guud.

24.2 Lama ogola in boodhadhka iyo waraaqaha ololaha doorashooyinka lagu dhejiyo:-

b. masaajiddada

t. xafiisyada iyo gaadiidka dawladda.

j. xarumaha diblumasiyiinta iyo

x. ururada caalamiga ah.

**QODOBKA 25-aad**
**HUB IYO LEBBIS CIIDANNIMO**

Bannaan-baxyada ololaha doorashooyinka waxaa ka reebban in loo qaato Hub, Lebbis ciidan ama wax u eg.

**QODOBKA 26-aad**
**WAKIILLADA URURADA/XISBIYADA**

26.1 Guddiyada dhexe ama kuwa gobollada ama degmooyinka ee ururadu/xisbiyadu, waxay wakiil leh xaqa cod-bixinta usoo dirsan karaan goob kasta oo cod-bixin ka dhacayso oo ay murashixiin ku leeyihiin, waxaa kale oo ay keeni karaan beddelkiisa haddii uu maqnaado.

26.2 Wakiilada ay ururadu/xisbiyadu soo dirsadeen waa in ay goob-joog ahaadaan marka xafiiska doorashadu hawsha hayo, soona jeediyaan wixii tabasho ama caddeyn ay qabaan (haddii ay jirto), taas oo la diiwaan-gelinayo.

26.3 Magacyada wakiilada ururada/xisbiyada ee goobaha cod-bixinta waa in loo geeyo

guddiga doorashooyinka 20 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta, Guddiga Doorashooyinku waxay siinayaan wakiil kasta qoraal oggolaansho ah oo u fasaxaya in uu geli karo, kana hawl-geli karo goobta cod-bixinta ee loo soo diray.

## Qodobka 27-aad
## Shuruudaha Doorashada Xubnaha Golaha Deegaanka

Qofka loo dooranayo inuu xubin ka noqdo Golaha Deegaanka waa inuu buuxiyaa shuruudaha soo socda:-

27.1 Muwaadin kasta oo Muslim ah, guta waajibaadka diiniga ah, xil-kas ah, garaadkiisu dhan yahay, Puntlander ah, da'diisuna aanay ka yarayn Labaatan iyo shan (25) sano waa loo dooran karaa inuu xubin ka noqdo golayaasha deegaanka Puntland, sida ku cad qodobka 126-aad ee dastuurka dawladda Puntland.

27.2 Waa inuu leeyahay aqoon dugsi dhexe ama wax u dhigma.

27.3 Waa inaan xuquuqdiisa muwaadinnimo la laalin Shantii (5) sano ee ugu dambeysey.

27.4 Waa in aanu ahayn shaqaale dawladeed.

27.5 Waa inuu aqoon u leeyahay saldhigga iyo seynsaabka bulshada deegaankiisa.

27.6 Waa inuu leeyahay akhlaaq wanaagsan iyo dad la dhaqan.

27.7 Waa in uu buuxiyo shuruudaha kale ee Doorashada

## QODOBKA 28-aad
## QALABKA XAFIISYADA DOORASHOOYINKA

28.1 Guddiga Doorashooyinku waa in ay goob cod-bixineed kasta u diyaarisaa qalabkan:

b. nuqul xeerkan ka mid ah.

t. xidhmo lingaxan oo ay ku jirto shaabaddii goobta cod-bixinta oo ay la socdaan khadkii iyo khadeeyihii.

j. xidhmo lingaxan oo ay ku jiraan waraaqihii cod-bixintu.

x. sanaadiiqdii cod-bixinta lagu ridayey.

Kh. Weel lagu qaado waraaqaha cod-bixinta.

d. saddex foom oo lagu qoro hawl-galka codbixinta.

r. foom leh khaanado jeex-jeexan

s. qalimo biro ah oo ku filan calaamadaynta waraaqaha cod-bixinta.

Sh. Ugu yaraan (5) waraaqood oo tusinaya qaabka cod-bixinta.

28.2 Guddigu waa inay xafiiska dhexe ee doorasho degmo ama gobol kasta u diyaarisaa qalabkan:

b. nuqul xeerkan ah.

t. xidhmo lingaxan oo ay ku jirto shaabaddii xafiiska degmada, gobolka ee doorasho oo ay la socdaan khadkii iyo khadeeyihii.

j. saddex foom oo lagu qorayo hawl-galka cod-bixinta xafiiska doorashada ee degmada ama gobolka.

x. foom leh shax jeex-jeexan iyo

kh. qalabka wax lagu qoro oo kala duwan.

28.3 Qalabka xafiis kasta oo doorasho waa in lagu rido saxaarad gaar ah. Saxaaradda waa in la xiro oo la lingaxo.

28.4 Guddigu waa in ay qalabkaas dirto wakhti ku habboon, iyadoo ay la socdaan sanaadiiqdii codka lagu ridayey, waxaana loo dirayaa xafiisyada doorashada degmada ama gobolka oo usii gudbinaya goobaha cod-bixinta.

## QODOBKA 29-aad
## WARAAQAHA COD-BIXINTA

29.1 Waraaqaha cod-bixinta waa in ay ku daabacan yihiin astaamaha ururada/xisbiyada tartamaya.

29.2 Astaan kastaa waa in ay leedahay meel bannaan oo loogu talagalay inuu cod-bixiyuhu ku muujiyo codkiisa.

## QODOBKA 30-aad
## HABAYNTA LIISASKA RASMIGA AH IYO GOOBAHA COD-BIXINEED

30.1 Goob kasta oo cod-bixinta laga dhiibanayaa, waa in ay lahaato laba qol oo yar yar oo loogu talagalay in lala galo calaamadaynta waraaqaha cod-bixinta, loona habeeyo in qarsoodi codka lagu bixiyo.

30.2 Sanaadiiqda cod-bixinta lagu ridayo, waa in ay yaalaan meel muuqata ama hareeraha ka xigaan miisaska guddoomiyaha goobta cod-bixinta.

## QODOBKA 31aad
## QAYBINTA QALABKA DOORASHADA

Xafiiska doorashada degmadu waa in uu hubiyo in goob kasta oo cod-bixin ka dhacayso la geeyo wixii qalab ah ee loo baahan yahay, ugu yaraan hal (1) saac ka hor intaan codayntu bilaabmin, si loo dhammaystiro diyaar-garowga loo baahan yahay, codayntuna ku bilaabmato waqtigii loogu talagalay.

## QODOBKA 32-aad
## HAW-GELINTA XAFIISKA GOOBTA COD-BIXINTA

32.1 Guddoomiyaha goobta cod-bixintu markuu helo qalabka ku xusan qodobka 31-aad la soo dhaafay waa inuu:

b. dhiso xafiiska oo uu hubiyayaasha iyo xoghaynta u sheego in ay yihiin hawl-wadeenadii goobta, isla markaana la socodsiiyo sida ay hawsha loo xilsaaray u gudanayaan.

t. hubiyo in wakiilada ururada/xisbiyada ee loo soo ogolaaday inay goob-joog ahaadaan inay wada joogaan.

j. markuu hubiyo inay saxaaraduhu lingaxan yihiin, waa inuu furo saxaaradda oo hubiyo in qalabkii ku jirey dhan yahay iyo in kale, waana inay goob-joog ahaadaan hawl-wadeenadii goobta iyo wakiiladii ururada/xisbiyada.

x. markuu hubiyo isaga iyo hawl-wadeenadiisa iyo wakiiladu in xidhmooyinka ay ku jiraan

shaabadda goobta iyo waraaqaha cod-bixintu, ayna lingaxan yihiin, waa inuu furo xidhmooyinka oo waraaqaha cod-bixinta la dhaco shaabadda goobta, oo si nidaamsan ugu rido weel xafidan.

Kh. Waxaa reeban in ay goobta joogaan qof ama ka badan oo aan ahayn inta goobta ku qoran.

d. In uu hubiyo in ay ogeysiinta ku qoran yihiin tilmaamaha cod-bixinta iyo in liisaska murashixiintu ku dhegan yihiin meelihii loogu talagalay.

r. inuu hubiyo in qalabkii loo baahnaa ee cod-bixinta loogu talagalay loo agaasimay sida xeerku tilmaamayo, si hawsha doorashadu si hufan ugu hirgasho.

32.2 Waa inuu diiwaan-geliyo dhammaan hawl-galka kor ku xusan in la fuliyey, qoraalkana waa in ay ku caddaato shaabadda goobta, tirada waraaqaha cod-bixinta ee goobta cod-bixintu heshay.

32.3 Waa inuu markaa ka saxiixo hawl-wadeenada iyo wakiiladaba, in wax waliba sidii loogu talagalay yihiin.

32.4 Markuu hubiyo guddoomiyaha goobta cod-bixintu in hawshaasi qabsoontay, waa inuu ku dhawaaqo in cod-bixintu furan tahay.

32.5 Haddii ay ururada/xisbiyada siyaasaddu goob cod-bixineed u soo diran waayaan wakiilo, hawsha doorashadu u xanibmi mayso, hawl-wadeenada guddiga doorashada ee goobtuna shaqadooda way wadanayaan.

## QODOBKA 33-aad
## AWOODDA GUDDOOMIYAHA GOOBTA COD-BIXINTA

33.1 Guddoomiyaha goobta cod-bixinta waxaa waajib ku ah inuu ilaaliyo nidaamka inta doorashadu socoto.

33.2 Booliiska ayuu ku amri karaa inuu qof goobtaa dibedda uga saaro ama in la qabto qof

gef ku sameeyey hawsha doorashada ama qof waali ay ka muuqato.

33.3 Booliiska looma ogola inuu galo gudaha goobta cod-bixinta, haddii aanu guddoomiyuhu amrin.

33.4 Saraakiisha Booliiska iyo kuwa shaqaalaha dawladda, waa in ay fuliyaan codsiyada guddoomiyaha goobta, si loo hubiyo in si dhib yar codka loo bixiyo, oo aanay dhicin in lagu ururo miiska hawl-wadeenada ama goobta agteeda.

33.5 Guddoomiyaha goobta cod-bixinta iyo kuwa xafiiska dhexe, waxay xaq u leeyihiin inay isticmaalaan awooddaha ku qoran faqradaha qodobkan.

## QODOBKA 34-aad
## GELIDDA GOOBTA COD-BIXINTA

34.1 Xafiiska goobta cod-bixinta waxaa geli kara oo kaliya dadka maamulaya xafiiska, wakiilada ururada/xisbiyada, cod-bixiyayaasha, goob-joogayaasha caalamiga iyo maxaliga ah ee guddigu siiyey aqoonsiga.

34.2 Waxaa reeban in cod-bixiyayaashu hub la yimaadaan goobta; markiiba qof ayaa gelaya, iyadoo loo kala hormarinayo sidii loo soo kala horreeyey, hase yeeshee waa la tixgelin karaa inuu ugu hormaro haddii uu jiro qof ka shaqaynaya hawsha doorashada oo doonaya inuu codkiisa bixiyo.

## QODOBKA 35-aad
## COD-BIXIYAYAASHA AAN CODKA DHIIBAN KARIN

35.1 Waxaa codkiisa dhiiban kara cod-bixiyaha taga goobta cod-bixinta oo codkiisa ku ridi kara sanduuqa cod-bixinta.

35.2 Haddii uu jiro qof ay naafonimo u diidey inuu codkiisa bixiyo, guddoomiyaha goobta cod-bixinta ayaa u oggolaanaya in cod-bixiye kale oo uu aaminsan yahay uu gacan siiyo, oo ka caawiyo sidii uu codkiisa u dhiiban lahaa.

35.3 Haddii uu jiro qof waayeel ah ama aan fahmi karayn halka uu warqadda ka calaamadinayo, guddoomiyaha goobta cod-bixintu wuxuu amrayaa in qof uu ku kalsoon y ahay ama haddii aanu jirinna hawl-wadeenada goobtu ay gacan ka siiyaan, oo ay ka caawiyaan sidii uu codkiisa u dhiiban lahaa, wakiilka ururka/xisbiga uu u codaynayaa goob-joog wuu ka ahaan karaa.

35.4 Xoghayaha goobta cod-bixinta ayaa qoraalka gelinaya sababta loo ogolaaday in qofkaas naafada ah laga kaalmeeyo sidii uu codkiisa u bixin lahaa, waxaa kale oo uu qoraalka ku muujinayaa qofka naafada ah, waayeelka ama qofka aan fahmi karahayn halka uu warqadda ka calaamadinayo iyo qofka kaalmeeyey.

## QODOBKA 36-aad
## NIDAAMKA COD-BIXINTA

36.1 Markuu dhammaado hawl-galka ku xusan qodobka 36-aad, guddoomiyaha goobta cod-bixintu, wuxuu cod-bixiyaha siinayaa warqaddii cod-bixinta oo lagu dhuftay shaabaddii goobta, oo laga reebay qaybtii haraaga ahayd ee laga gooyey.

36.2 Markaa cod-bixiyuhu waxa uu galayaa qolka yare e uu warqadda ku soo calaamadinayo, isagoo qolka soo xiranaya, inta uu warqadda calaamadinayo.

36.3 Cod-bixiyuhu wuxuu calaamad soo saarayaa warqaddii cod-bixinta ee khaanada ururka uu u coddeynayo.

36.4 Cod-bixiyuhu wuxuu dabaddeed u imaanayaa hubiyaha labaad, kaasoo far-yaradiisa bidix u marinaya khadka aan masaxmin, haddii aanu far-yaro bidix lahaynna, far-yarada gacanta midig, haddii aanu labada far-yaro midna lahaynna farta kale ee u soo xigta, iyadoo gacanta bidix mudnaanta khadaynta la siinayo, haddii aanu labada gacmood midna lahaynna meeshii kale ee jirkiisa ah ee muuqanaysa.

36.5 Markuu cod-bixiyuhu warqaddiisa ku rido meesha daloosha ee sanduuqa, waa inuu

goobta ka baxo, hubiyaha labaadna waa in uu hubiyo in khadku si fiican uga muuqdo.

36.6 Haddii uu arko cod-bixiyuhu intaanu codayn, in warqadda cod-bixintu aanay dhammayn, ama ay jeexan tahay, wuu soo celinayaa, waxanu codsanayaa in loo beddelo, dhacdadaasna waa in la diiwaan-geliyaa.

36.7 Guddoomiyaha goobtu wuxuu ku ilaalinayaa hawl-wadeenada kale ee xafiiska doorasho ee goobta gudashada xilkooda, waxaanu u gacan bannaanaynayaa kala-socodsiinta hawsha goobta.

36.8 Guddoomiyuhu wuxuu awood u leeyahay inuu debedda uga saaro cod-bixiyaha cududaar la'aan dhex meeraysta goobta iyo inuu cod-bixiyahaas dib uga soo celiyo warqadda cod-bixinta. Cod-bixiyahaas waxaa loo ogolaanayaa in uu codkiisa dhiibto kadib marka dadka safka taagani codkooda wada dhiibtaan.

36.9 Haddii cod-bixiye lagu helo isaga oo sita waraaqo cod-bixineed oo dheeraad ah ama ka duwan kuwa la isticmaalayo, guddoomiyuhu wuxuu si deg deg ah u amrayaa in laga qaado, wuxuuna u dhiibayaa ciidanka nabadgelyada si dacwad loogu oogo, dhacdadaasna qoraal ayaa lagu diiwaan-gelinayaa.

## QODOBKA 37-aad
## HAWL-GALKA COD-BIXINTA

37.1 Hawl-galka cod-bixinta waa in la dhammaystiro hal (1) maalin gudaheed oo ka bilaabmaysa 6:00 saac ee subaxnimo, kuna dhammaanaysa 6:00 fiidnimo.

37.2 Cod-bixintu way soconaysaa, oo waqtiga xiritaanka la tixgelin maayo, haddii ay jiraan cod-bixiyayaal safka ku jira oo aan weli codkooda bixin, ilaa ay ka dhammaanayaan.

## QODOBKA 38-aad
## GO'AANKA CABASHOOYINKA EE GOOBTA COD-BIXINTA

Xafiiska goobta cod-bixintu waa inuu si ku meel gaar ah go'aan uga gaaro cabashooyinka (haddii ay jiraan) ay ka midka yihiin kuwa af ahaan loo soo jeediyey iyo wixii muran ah ee ka dhasha

hawl-galka goobta cod-bixinta. Cabashooyinka iyo muranadaas waa in qoraal ahaan loo diiwaan-geliyo.

## QODOBKA 39-aad
## HAWSHA KA HOREYSA TIRINTA CODADKA

39.1 Marka ay cod-bixiyayaashu codadkooda bixiyaan, guddoomiyaha goobtu wuxuu cod sare ku dhawaaqayaa inay cod-bixintu xiran tahay.

39.2 Markuu guddoomiyaha goobtu ka ururiyo miiska dhammaan waraaqaha iyo qalabka aan tirinta wax ahmiyad ah u lahayn, wuxuu bilaabayaa hawsha soo socota:

b. wuxuu hubinayaa tirada cod-bixiyayaasha, isaga oo ka hubinaaya tirada waraaqaha cod-bixinta.

t. wuxuu ururinayaa oo tirinayaa waraaqaha cod-bixinta ee aan la isticmaalin, waxaanu ku ridayaa baqshadda 1aad.

j. wuxuu xaqiijinayaa oo saxiixiisa ku muujinayaa waraaqaha doorashada ee xumaaday ama aan hagaagsanayn ee ay soo celiyeen cod-bixiyayaashu, ama la arkay in ay xun yihiin, waxanu ku ridayaa baqshadda 2aad.

## QODOBKA 40-aad
## TIRINTA CODADKA

40.1 Marka guddoomiyaha goobtu dhammeeyo hawsha ku xusan qodobka 40aad, wuxuu bilaabayaa tirinta waraaqaha cod-bixinta ee sanduuqa ku jira. Si taa loo fuliyo hubiyuhu wuxuu markiiba sanduuqa ka soo saarayaa hal warqad cod-bixineed, wuxuuna u dhiibaya guddoomiyaha, guddoomiyuhuna wuxuu furayaa warqaddii cod-bixinta oo cod sare ku dhawaaqayaa ururka/xisbiga codka lagu siiyey; warqadaas waxaa hubiyuhu u sii gudbinayaa hubiyaha kale oo isna tusi doona wakiilada ururada/xisbiyada, markaas xoghayaha ayaa gelinaya foomka khaanadaysan ee loogu talagalay ururka/xisbiga codkaas helay, waxaanu warqadaas ku ridayaa sanduuqa loo sameeyey.

40.2 Ma bannaana in sanduuqa laga soo saaro warqad kale oo cod-bixineed inta tii ka horeysey laga dhammaynayo ee sanduuqa lagu ridayo, hawshaana waxaa maamulaya hawl-wadeenada goobta oo kaliya.

40.3 Guddoomiyaha goobtu markuu dhammeeyo tirinta, wuxuu hubinayaa inay is keenayaan tirada waraaqaha cod-bixinta iyo tirada codadka guud ahaan ay ururada/xisbiyadu heleen, wuxuuna intaas raacinayaa tirada codadka lagu muransan yahay ama aan hagaagsanayn ama aanay waxba ka jirin.

40.4 Guddoomiyaha goobtu, markuu caddeeyo ee uu sidaas saxiixiisa ku muujiyo wuxuu:

b. waraaqaha cod-bixinta ee wax-kama-jiraanka laga dhigay iyo waraaqaha cabashada ee wakiilada ururada/xisbiyada ku ridayaa baqshadda 3aad.

t. warqadaha cod-bixinta ee lagu muransan yahayna ku ridayaa baqshadda 4aad.

j. ugu dambeyntii, warqadaha ansaxay ee la tiriyey ku ururinayaa baqshadda 5aad.

40.5 Haddii sanduuqa cod-bixinta laga helo waraaqo dheeraad ka ah, kana duwan kuwii goobta lagaga codeeyey, sida iyaga oo aan lahayn shaabaddii goobta, lambarkii waraaqaha cod-bixinta ee goobta amaba nooc ahaan aanay la mid ahayn waraaqaha lagaga codeeyey goobta, hawl-wadeenada goobta cod-bixineed waxay ka dhex saarayaan waraaqaha la tirinayo, iyagoo tusaya wakiilada ururada/xisbiyada ee goobta cod-bixinta, kadibna waa la daadinayaa, iyadoo dhacdadaas la diiwaan-gelinayo.

## QODOBKA 41-aad
## XIRITAANKA HAWSHA TIRINTA

41.1 Markuu guddoomiyaha goobtu dhammeeyo hawsha tirinta ee ku xusan qodobka kore, wuxuu iyadoo fagaare ah ku dhawaaqayaa wadarta tirada cod-bixiyayaasha, codadka saxda noqday iyo tirada codadka uu helay liis kasta oo urur/xisbi.

41.2 Intaa dabadeed, baqshadaha waa la lingaxayaa, korkana waxaa lagaga dhufanayaa shaabaddii goobta, waxaana korka wadajir uga saxiixaya guddoomiyaha goobta, ugu

yaraan hal hubiye iyo wakiilada urur/xisbi kasta oo murashixiin ku leh goobta cod-bixinta.

41.3 Baqshadaha korkooda waxaa lagu qorayaa faahfaahinta waxa baqshadda gudaheeda ku jira.

41.4 Hawsha tirinta waa in loo dhammaystiro si is-dabajoog ah oo waafaqsan tartiibta la soo tilmaamay oo waliba aan hakad lahayn, wax kalena aan la dhex gelin.

41.5 Qoraallada raad-raaca ahi waa inay si cad u muujiyaan hawlaha kor ku xusan dhammaantood.

41.6 Goobta cod-bixinta marka natiijadu soo baxdo, waxaa guddoomiyaha goobtu wakiil kasta ee urur/xisbi ka saxiixayaa tirada uu ka helay goobta, lana shaacinayaa.

41.7 Marka ay dhammaato tirinta codadku, waxaa guddoomiyaha goobtu wakiilka urur/xisbi kasta siinaya tirada uu ka helay, wuxuuna ka saxiixayaa warqad caddeyn ah isla markaana waxaa lagu dhawaaqayaa urur/xisbi kasta tirada uu helay.

## QODOBKA 42-aad
## CODADKA XUMAADA AMA LAGU MURANSAN YAHAY

42.1 Waraaqaha cod-bixinta marka la tirinayo, waxay noqonayaan waxba kama jiraan haddii:

b. ay ka duwan yihiin waraaqaha cod-bixinta guddigu gartay in doorashada loo isticmaalo.

t. aanay lahayn shaabadda goobta cod-bixinta.

j. warqadda cod-bixinta ay ka muuqdaan qoraal ama calaamado ama raad si xirfad leh loo soo agaasimay oo aan loogu talagelin in lagu qoro.

x. warqadda cod-bixinta aanay si fiican uga muuqan karin urur/xisbiga codka la siiyey oo loo aqoonsan kari waayo.

Kh. warqadda cod-bixinta ay ka muuqato in cod-bixiyuhu uu calaamadeeyey hal astaan urur/xisbi wax ka badan.

42.2 Codku, waxba kama jiraan wuxuu noqon karaa marka go'aan wadajir ah ay isku raacaan

hawl-wadeenada goobta cod-bixintu. Haddiise ay isku raaci waayaan oo ay ku kala qaybsamaan, waxaa waraaqahaas cod-bixineed loo aqoonsanayaa kuwo muran ka taagan yahay.

42.3 Xafiiska doorashada ee degmada ayaa go'aan ka gaari kara waraaqaha cod-bixinta ee muranku ka taagan yahay.

## QODOBKA 43-aad
## QORAALKA RAAD-RAACA GOOBTA COD-BIXINTA

43.1 Natiijada raad-raaca ee goobta cod-bixinta, waxaa lagu qorayaa foomka uu soo diyaariyey guddiga doorashooyinku oo ka kooban xaashi asal ah iyo inta nuqul ee loo baahdo, iyadoo meel fagaare ahna uu guddoomiyaha goobtu kaga dhawaaqayo:

b. tirada guud ee ka codaysay goobtaas.

t. tirada codadka xumaaday.

j. tirada codadka lagu muransan yahay.

x. tirada codadka ansaxay iyo

kh. tirada ay kala heleen ururadu/xisbiyadu.

43.2 Xaashida asalka ah ee foomka ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, waxaa loo gudbinayaa guddoomiyaha xafiiska doorashada ee gobolka, laba (2) nuqulna waxaa lagu ridayaa isla sanduuqa ay ku jiraan baqshaddaha lingaxan ee ku xusan qodobka 46aad faqraddaha 1aad iyo 2aad ee xeerka iyo wixii ka haray agabkii doorashada, waxana loo gudbinayaa xafiiska doorashada ee degmada, nuqulada kalana waxaa la kala siinayaa wakiilada saddexda xisbi ee guulaystey.

## QODOBKA 44-aad
## QAADISTA IYO WAREEJINTA AGABKA

44.1 Guddoomiyaha goobta cod-bixinta oo ugu yaraan ay la socdaan xubin hawl-wadeenada ka tirsan iyo Booliis ilaalo ah, ayaa qaadaya qoraalka raad-raaca iyo baqshaddaha goobta,

kuna wareejinaya xafiiska doorashada ee degmada, iyadoo aan lahayn wax dib-u-dhac ah.

44.2 Marka xafiiska doorashada ee degmada lagu wareejinayo, baqshaddaha waa in la hubiyo inay lingaxan yihiin, oo aan la furin, lana farafarayn.

44.3 Ugu dambayn waa in guddoomiyaha doorashada ee degmadu uu bixiyo caddaynta la wareegidda agabkaas oo qoraal ah.

**QODOBKA 45-aad**
**HAWSHA XAFIISKA DOORASHADA EE DEGMADA**

45.1 Markuu guddoomiyaha xafiiska doorashada ee degmadu helo agabka lagu tilmaamay qodobka 45aad ee xeerkan waa in uu:

b. faro hubiyayaasha, xoghayaha iyo tiriyeyaasha inay hawshooda u diyaar-garoobaan.

t. u yeero wakiilada ururada/xisbiyada ee murashixiin ku leh degmada ee guddigu soo ogolaaday inay goob-joog ahaadaan inta hawshu socoto.

j. marka ay wada hubiyaan guddoomiyaha, hawl-wadeenada iyo wakiiladu inay saxaaraduhu lingaxan yihiin oo aan la farafarayn, waa in guddoomiyuhu furo saxaarada oo ka soo saaro qalabka ku jira oo hubiyaa.

x. markay wadajir u hubiyaan in baqshaduhu lingaxan yihiin oo aan hore loo furin, waa in guddoomiyuhu uu furaa baqshadda ay ku jirto shaabaddu oo hubiyaa in lambarka shaabaddu ku yaal qoraalada.

45.2 Xafiiska doorashada ee degmadu waa in uu markaas hubiyo in qoraalada iyo baqshadaha ku xusan qodobada 43, 45 iyo 48 ee xeerkan ay dhan yihiin.

**QODOBKA 46-aad**
**HAWSHA XAFIISKA DOORASHADA EE GOBOLKA**

46.1 Xafiiska doorashada ee gobolku, markuu helo qoraalada raad-raaca goobaha cod-bixinta iyo natiijada guud ee codadka ka soo baxay degmooyinka gobolka iyo inta uu urur/xisbi kasta ka helay ee ay usoo gudbiyeen xafiisyada doorashooyinka ee

degmooyinka gobolku wuxuu hubinayaa xisaab ahaan natiijada codadka.

46.2 Xafiiska doorashada ee gobolku wuxuu ka go'aan gaarayaa wixii cabasho ka taaganayd ama lagu muransanaa ee loo 'soo gudbiyey, iyadoo ay goob-joog yihiin wakiilada ururada/xisbiyada tartamaya, wuxuu isu geynayaa natiijooyinka doorashada ee degmooyinka gobolka, waxaanu soo saarayaa:

b. tirada guud ee codadka laga dhiibtay dhammaan degmooyinka gobolka.

t. tirada guud ee codadka xumaaday ee degmooyinka gobolka.

j. tirada guud ee codadka ansaxay ee degmooyinka gobolka.

x. tirada codadka ay kala heleen ururada/xisbiyada tartamay.

46.3 Kadib markuu natiijada doorashada ee gobolka geliyo foomka loogu talagalay, waxaa guddoomiyaha doorashada gobolku, iyadoo fagaare ah, ku dhawaaqayaa natiijada doorashada ee gobolka.

46.4 Xafiiska doorashada ee gobolku wuxuu:

b. natiijada raad-raaca ah ee doorashada gobolka ku qorayaa foomka ku xusan faqradda 3aad ee qodobkan oo ka kooban xaashi asal ah iyo nuqulada loo baahan yahay

t. xaashida asalka ah, oo uu ku lifaaqan yahay nuqul ka mid ah natiijada doorashada ee degmo kasta oo gobolka ka tirsan, wuxuu u dirayaa maxkamadda sare.

j. laba (2) nuqul oo ay ku lifaaqan yihiin xaashiyihii asalka ahaa ee natiijooyinka doorashada ee degmooyinka gobolkana wuxuu u dirayaa Guddiga Doorashooyinka Puntland.

x. nuqulada kalana wuxuu kala siinayaa wakiilada saddexda Xisbi ee guuleystey ee xafiiska doorashada gobolka.

## QODOBKA 47-aad

## TIRINTA CODADKA DOORASHADA DEGAANKA IYO KU DHAWAAQIDDA NATIIJADA

Guddoomiyha xafiiska doorashada ee degmadu markuu helo agabka ku xusan qodobka 45aad ee doorashada deegaanka, waa inuu:

47.1 Tiriyo oo isu geeyo dhammaan cod-bixinta ka soo baxday goobaha cod-bixinta ee degmada

47.2 Hubiyo codadka waxba kama jiraanka ah ee ka soo xerooday goobaha cod-bixinta ee degmada.

47.3 Tiriyo codadka ansaxay ee urur/xisbi kasta ka helay doorashada degmada.

47.4 Xisaab ahaan isu qaybiyo tirada guud ee codadka ansaxay ee degmada iyo tirada kuraasta degaanka degmada, soona saaro inta urur/xisbi waliba ka helay codadka.

47.5 Hubiyo urur/xisbi kasta inta uu ka helay kuraasida degaanka.

47.6 Markaas ku dhawaaqo magacyada murashixiinta ee urur/xisbi kasta ku guuleystey doorashada, iyagoo isugu xiga siday u kala horeeyeen, sida uu tilmaamayo qodobka 18aad ee xeerkan .

47.7 Natiijada doorashada degmada si fagaare ah ugu dhawaaqo, kuna dhejiyo boorka xafiiska doorashada ee degmada magacyada murashixiinta guuleystay.

## QODOBKA 48-aad

## GUDBIN RAAD-RAAC

48.1 Raad-raacyada hawl-galada ku xusan qodobada 46 iyo 47 ee xeerkan waxaa lagu qorayaa Foomamka Guddiga Doorashooyinka ee KMG u diyaariyey mid kasta, waana inay ahaadaan min saddex (3) nuqul.

48.2 Nuqulada raad-raacyada waxaa loo qaybinayaa sida ay tilmaamayaan qodobada 47aad iyo 50aad ee xeerkan.

## QODOBKA 49-aad
## SOO SAARIDDA GO'AANADA DOORASHOOYINKA DEEGAANNADA

Xafiiska doorashada ee degmadu waa inuu soo saaro go'aanka doorashada degmada, iyagoo natiijada ku muujinaya qoraal kooban oo ay ku qoran yihiin magacyada murashixiinta ku guulaystay doorashada deegaanka, waxaana lagu dhejinayaa xafiiska maamulka dawladda hoose ee ay khusayso, iyagoo nuqul ka mid ahna u gudbinaya xafiiska dhexe.

## QODOBKA 50-aad
## HUBAAL-CELINTA DOORASHADA DEGMADA

50.1 Guddiga doorashooyinku waa in uu hubaal-celiyo oo ansixiyo go'aanka doorashada goleyaasha deegaanada, waana in uu go'aan ka gaaro wixii muran ama cabasho ah ee guud ahaan uu u soo gudbiyey xafiiska doorashada ee degmadu ee soo baxay intii hawshu socotey.

50.2 Wixii tabasho ama dacwad ah oo ay xallinwaayaan Guddiga Doorashooyinku waxaa loo gudbinayaa Maxkamada sare muddo (10) toban cisho gudahood ah, ku dhawaaqida natiijada doorashada ku meel gaarka ah waxaa go'aan ka gaaraya Maxkamada Sare.

## QODOBKA 51-aad
## MUDDADA XIL-HAYNTA GOLAYAASHA DEEGAANKA

Muddada xil-haynta ee mudaneyaasha loo doorto goleyaasha deegaanka waxay ahaanaysaa shan (5) sano, sida ku cad qodobka 123-aad faqraddiisa 3-aad ee Dastuurka DPL.

## QODOBKA 52-aad
## DEGMO DOORASHOOYINKA GOLAYAASHA DEEGAANKA

52.1 Doorashooyinka 1-aad ee Golayaasha deegaanku waxay ka dhacaysaa 48-degmo

52.2 Dawladda Puntland waa in ay kala xadaysaa degmooyinka aan xuduudaha lahayn ka hor doorashooyinka 2-aad ee golayaasha deegaanka, si degmooyinka Puntland oo dhan doorashadu uga wada dhacdo.

## QODOBKA 53-aad
## BURIN

Waxaa la buriyey Xeer kasta oo ka hor imaanaya ama la socon karin Xeerkan.

## QODOBKA 54-aad
## DHAQANGAL

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka Golaha Wakiiladu ansixiyo, Madaxweynuhu saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.